



Australian Government



ParentsNext

Damaanad qaadka adeega ParentsNext



Damaanada Adeegyada ayaa ka tarjumeysa waxyaabaha ay ka fileyso Dowladda Australiya ee bixiyeyaasha ParentsNext marka ay kuu soo gudbinayaan adeegyada ParentsNext. Waxay dejineysaa heerka ugu hooseeya ee adeegga aad filan kartid inaad heshid, iyo sidoo kale shuruudaha aad u baahan tahay inaad buuxisid intaad u diyaar garoobaysid shaqada.

Taageerayaasha ParentsNext wuxuu taageeraa waalidiinta iyo daryeeleyaasha inay u diyaargarobaan shaqada marka ilmahooda ugu yar uu dugsiga bilaabo. Dawladdu waxay ku gaarsiisaa Waalidiinta Tan xigta shabakad qaran oo adeeg bixiyayaal ah.

Bixiyahaagu wuxuu:

- kaa caawinaya inaad garatid meelah aad ku wanaagsan tahey iyo wixii caqabado ah ee aad kala kulantid shaqada mustaqbalka
- kaa caawinaya inaad aqoonsatid himilooyinkaaga waxbarasho iyo shaqo iyo dariiqa aad ku gaari kartid
- kula shaqeyn doono si aad u horumarisid Qorshaha Kaqeybqaadashada, kaasoo qeexaya shuruudaha kaqeybgalka waalidkaaga ee soo socda
- kugu xidhiidhiyo waxqabadyada iyo adeegyada bulshadaada si ay kaaga caawiyaan inaad isu diyaarisid shaqo tusaale ahaan koorasyada waxbarashada, hagista, taageerada aan xirfadda lahayn iyo daryeelka carruurta
- kula soo xidhiidhi karo seddexdii biloodba mar si aad dib ugu eegtid himilooyinkaaga, horumarka aadna u cusboonaysiiso Qorshahaaga Kaqeybqaadashada haddii loo baahdo
- haddii aad diyaar u tahay inaad shaqeysid, waxay kaa caawineysaa inaad shaqo heshid oo kaa taageertid kabidda mushaharka ama kaalmada dib udejinta haddii aad xaq u leedahay
- waxay kugu dhiirigelinaysaa inaad fikrad ka dhiibatid sida loo bixiyo adeegyada ParentsNext
- gaarsiyaan adeegyada ku xusan Qorshahooda gaarsiinta Adeegooda, Service Delivery Plan
- kuula dhaqmo si cadaalad ah, xushmad leh iyo hab dhaqan xasaasi ah
- Adeegyadooda ka soo dhiibo boggaga saaxiibtinimada u leh carruurta si aad ugu kaxaysid carruurtaada ballamahaaga.

Waxii macluumaad intaa dhaafsiisan tag dese.gov.au/parentsnext

Maxaa adiga lagaa rajeyneyaa

- Samee wax kasta oo aad ku heshiisay inaad ku sameyso Qorshahaaga Kaqeybqaadashada, Participation Plan
- ka qayb qaado ballamaha bixiyahaaga
- la xidhiidh dhakhtarkaaga sida ugu dhakhsaha badan haddii aadan awoodin inaad timaadid ballantaada ama waxqabadkaaga
- ogeysii bixiyahaaga haddii duruufahaagu isbadalaan tusaale ahaan. waxaad bedeshaa cinwaankaaga ama lambarka taleefankaaga
- ula dhaqan daryeel bixiyahaaga si cadaalad ah, xushmad leh iyo hab dhaqan xasaasi ah.

Waxa laga yaabaa in lacagtaada la hakiyo haddii aadan buuxinin shuruudahaan.

MUHIIM

Macluumaadkaaga shaqsiyadeed waxaa ilaaliya sharciga, oo uu kujiro *Xeerka Asturnaanta ee 1988*. Bixiyahaaga ayaa kaliya u sheegi doona adeeg bixiyaasha waxyaabo adiga kugu saabsan oo laxidhiidha kaqeybgalkaaga ParentsNext.

Bixiyahaagu sidoo kale wuxuu macluumaadka la wadaagi karaa hay'adaha kale ee dawladda haddii ay u baahdaan, si loo hubiyo inaad helaysid heerka saxda ah ee taageerada.

Waad weydiisan kartaa inaad marin u heshid macluumaad kasta oo adeeg bixiyahaagu kaa hayo oo la saxo haddii loo baahdo.

Bogaadin, talooyin ama cabashooyin

Aragtidaada ku saabsan adeegyada aad heshid waa muhiim.

La hadal adeeg bixiyahaaga haddii aadan u maleynaynin inaad helaysid caawimaad sax ah. Bixiyahaagu wuxuu ku siin doonaa nidaam jawaab celin cadaalad ah iskuna dayi inaad xallisid welwelkaaga. Haddii aad dareentid inaad la hadli karin daryeel bixiyahaaga, la xidhiidh Khadka Adeegga Macaamiisha Qaranka ee Waaxda (Department's National Customer Service Line):

Taleefan ahaan:

1800 805 260 (bilaash khadadka guryaha)

limayl ahaan:

nationalcustomerserviceline@dese.gov.au

Haddii aad leedahay amaan ama aad jeceshahay inaad soo jeedisid si aad u horumarisid adeeggaaga ParentsNext, la socodsii bixiyahaaga inuu ogaado ama wac Khadka Adeegga Macaamiisha Qaranka (National Customer Service Line).

Wac khadka Centrelink Families ee **136 150** si aad u hesho macluumaad kusaabsan bixinta taageeradaada dakhliga ama booqo **servicesaustralia.gov.au**.



Waxii macluumaad intaa dhaafsiisan tag dese.gov.au/parentsnext